

Waa maxay mantarku?

Giddigeen waxaynu la kulannaa dad kale, kuwasoo markaynu dhexgalno ee wada hadalno, ahmiyad wayn inoo yeesha, sida macallin, saaxiib ama qof qaraabo ah.

Qofkaas ayaa loogu yeedhaa mantar.

Qofka, mantarku caawiyo waxaa la yidhaahdaa mantii. Mantarku wax buu dhegaystaa, waxana uu suurageliyaa in arrin laga warsado. Mentarka iyo mantiigu waa isku mudnaan iyo meeqaan. Labadoodu waa inay xog is dhaafsadaan si wada hadalkoodu u furmo. Haseyeeshee waa baahida mantiiga, ta ajandaha wda hadalku ku salaysan yahay.

Maxaa loo yeeshaa mantar?

Xidhiidhka mantarku waa kaalmayn iyo is kaalmayn. Qofku inuu mantar yeeshaa ma tilmaamayso inuu jilicsan yahay ama yahay qof la'aad ah. Haseyeeshee waa in si talantaalli ah labadooduba uga faaidaan xidhiidhkooda.

Sababo kala duwan baa keeni kara in mantar la yeesho. Waxaa qof khabiir ah laga la hadli karaa masalooyin xirfadeed ama kuwo shakhsi ah, hadduu qofku doonayo inuu xidhiidhkiisa ballaadhiyo ama uu rabo inuu wax ka ogaado arrin gaar ah.

Hoggaamiyayaasha shirkaduhu waxay doortaan tusaale ahaan mantar dhallinyaro ah, si ay u wanaajiyaan xidhiidhka shaqaalahooda dhallinyarada ah.

Waxaad u baahan kartaa mantar, haddii tusaale ahaan aad bilaabayso ganacsi, oo aad rabto inaad fikraddaada kala hadasho qof kaloo ganacsade ah. Waxaa kaloo su'aalo khuseeya waxbarashada iyo shaqada aad waydiin kartaa mantar, si aad uga faaidaysato waayoaragnimadiisa waxbarashada iyo shaqada.

Gebagebo ahaan mantarku wuxuu kaa caawin karaa inaad wax badan ka ogaada awooddaada, fursadahaaga iyo bulshada aad la nooshahay intaba.

Maxaa looga baahan yahay hawlwadayaasha mantarka?

Hawlwadayaasha mantarku waa 21 qof oo xooggan oo darban, kuwaasoo helay jidkii ay u mari lahaayeen bulshada dheenishka. Waxaad ku wada hadli kartaan af dheenish ama luqad kale. Sidaas awgeed u ma baahnid inaad sugto inta af dheenishkaagu xoogaysanayo. Haddii aad taqaan mid kamid ah 18kan af ee xoogagga mantarka, islamarkiiba waxaad dooran kartaa mantar si aad dhakhso ugu gaadho danahaaga.